

Paid Sick and Safe Time Ordinance

Hab raaca Waqtiga fasaxa xanuunka lacagta lagu baxsho iyo badbaadada (PSST, Paid Sick and Safe Time) wuxuu ka doonayaa shirkadaha loo shaqeeyo inay siiyaan shaqaalaha fasaxa markay xanuunsadaan mushaarka ay ku helayaan. PSST waxaa loo adeegsan karaa maqnaanshaha shaqaaluhu ka maqan yahay shaqada xanuun awgiis, balamo caafimaad awgood, ama xaalad dhanka amaanka ah oo daran awgeed.

SHIRKADHA Loo SHAQEEYO WAA INAY SIIYAAN SHAQAALAHA WAQTIGA FASAXA XANUUNKA LACAGTA LAGU BAXSHO IYO BADBAADADA

Shaqaalaha ayaa u adeegsan kara PSST ga u aruurta:

- Daryeelka naftooda ama qof ehelkood ah oo qaba xanuun dhanka jirka ama dhimirka ah, ayna ku jiraan aadista balanta dhakhtarka.
- Daryeelka naftooda ama qof ehel ah ama qof ay qol iskula nool yihiin sababo la xariira rabshad qoyska ah, weerar galmo ama daba galid lagu sameeyay.
- Marka goobtooda ganacsiga ama dugsiya ama goobta daryeelka ee ilmahooda lagu xiro amar kasoo baxay dawlada sababo caafimaad awgood.



XEERKAAN WUXUU QABANAYAA SHIRKADHA Loo SHAQEEYO OO LEH UGU YARAAN HAL SHAQAALA, OO KA SHAQEEYA SEATTLE.

DHAMMAAN SHAQALAHA AYAA U QALMA FAA'IIDADAAN, AYNA KU JIRAAN KUWA MAALINTA DHAN SHAQEEYA, KUWA NUS MAALINTA SHAQEEYA IYO SHAQAALAHA KU MEEL GAARKA AH.

XAJIMIGA SHIRKADA

SHAQAALAHA MAALINTA DHAN SHAQEEYA (FTES)

QIIMAYAASHA PSST

**KAYDSIGA PSST ga SAACADAHA LA
SHAQEEYAY AYAA GALAAYA SAACADAHA
PSST EE AAN LA ISTICMAALIN (SANADKIIBA)**

oo dhan ilaa 49 FTEs	50-249 FTEs	250+ FTEs
1 saac 40 kii saacadood ba	1 saac 40 kii saacadood ba	1 saac 30 kii saacadood ba
40 Saacadood	56 Saacadood	72 Saacadood *108 saacadood shirkadaha leh PTO

YAA ADEEGGA HELAAYA?

Xeerarkeena ayaa daboolaa shaqaalaha ka shaqeeya gudaha daafaha Seattle, ayadoon laga eegayn aqoonsigooda soo galootiga ama goobta shirkada ay ka shaqeeyaan.

Haddii aan xaaladaadu u qalmin baaritaanka aan samayno, waxaan kuu gudbin doonaa wakaalad kale oo ku caawinaysa.

AARGOOSIGA

Shirkad kama aargoosan karto shaqaale sabab la xariirta:

- Raadsashada xaquuqdiisa ku cad sharciyadaan.
- U gudbinta cabasho OLS.
- U sheegista dadka kale xaquuqdooda.

ADEEGYADEENA

- Baaritaanada cabashooyinka.
- Isku xirka shaqaalaha.
- Caawimaad farsamo oon siino ganacsiga.
- Ilaha iyo gudbinada.

Fasiraada, turjumaada luuqada iyo hooy ayaa diyaar ah. Dhammaan adeegyadu waa bilaash.

XAAFIISKA HEERKA SHAQAALAHA EE MAGAALADA SEATTLE



Shaqada OLS waa in la hormariyo heerarka shaqaalaha ayadoo la adeegsanaayo wada shaqayn waxtar ah oo lala yeesho bulshada iyo ganacsiyada, hormarinta xeer xoojin iyo hal abuur leh, ayadoo muhiimada la siinaayo sinaan bulsho iyo isir.

**XOG DHEERAAD AH
(206) 256-5297**

laborstandards@seattle.gov
seattle.gov/laborstandards